

Fursado kale ayaad leedahay



UDI

Utlendingsdirektoratet
Norwegian Directorate
of Immigration

Fursado kale ayaad leedahay

Qof walba wuxuu xaq u leeyahay nolol aan cabsi iyo hanjabaad lahayn. Haddii adiga ama carruurtaada si xun loola dhaqmo, waxaad markaa heli kartaa oggolaasho joogitaan oo madaxbannaan. Uma baahnid in aad qofkaas la sii noolaato adiga oo ka baqaya in aad lumiso oggolaashada joogitaanka ee Norway.

Yaa la siin karaa oggolaasho joogitaan?

- Waa in aad tahay qof haysta ama haysan jiray oggolaasho joogitaan iyada oo Norway laguugu keenay qof aad is qabtaan ama gashaan (samboer) tiihin.
- Qofka aad is qabtaan ama gashaanka tiihin waa in uu haystaa dhalashada norwijiiga, dhalashdada dalalka waqooyiga (nordisk), oggolaasho joogitaan oo waaraysa ama oggolaasho joogitaan oo noqon karta mid waarta.
- Waa in qofka aad is qabtaan ama gashaanka tiihin uu adiga ama ilmahaaga si xun ula dhaqmay intii aad Norway ku wada noolaydeen.
- Waa in aad ka guurtay qofka aad is qabtaan ama gashaankaaga ah.
- Ma jiro wax shardi ah oo la xiriira dhererka muddada aad Norway joogtay.

Maxaa si xun ula dhaqmid ah?

Si xun ula dhaqmid waa isticmaalka hanjabaadda, khasabka, gacanqaadka ama hor istaagidda xorriyadda qofka. Si xun ula dhaqmiddu waxay noqon kartaa mid jir ahaaneed, mid maskaxiyan ah ama mid galmo. Marka aan haddaba qiimaynta ku samaynayno in si xun laguula dhaqmay iyo in kale, waxaa tusaale ahaan loo baahan yahay in la ogaado in:

- lagu riixay
- timaha lagu jiiday
- lagu garaacay
- lagu haraatiyay
- laguu hanjabay
(si toos ah iyo si dadban)
- lagugu cadaadiyay falal galmo ah
- lagu kuksaday
- aad la kulantay falal kale oo faraxumayn galmo ah
- lagu koontaroolay
- gudaha lagugu xiray ama albaabka lagaa xirtay
- laguu diiday in aad la xiriirto qoyskiinna iyo saaxiibbadaa
- laguu diiday in aad si xor ah bannaanka u marto, tusaale ahaan laguu diiday in aad ka qaybqaadato barashada af-norwiijiga
- lagu caayay
- layska kaa indha tiray

- dadka kale lagaa qoqobay
- cunto laguu diiday
- laguu diiday in aad fikraddaada dhiibato

Si oggolaasho loo helo, caadi ahaan waa in ay dhacdooyinku ahaadaan kuwo halis ah ama kuwo soo noqnoqda. Haddii uu gacanqaadku yahay mid aan halis wayn ahayn, waa in uu yahay mid dhawr jeer dhacay qaybna ka ah habdhaqan jira.

Haddii aad hayso wax dukumiinti ah oo caddaynaya sida xun ee laguula dhaqmay ama warqad ay dad kale soo qoreen oo ka hadlaysa waxa kugu dhacay, codsiga ayaad kuwaas ku soo lifaaqi kartaa. Laakiin haddii aadan haynin wax dukumiinti ah oo caddaynaya sida xun ee laguula dhaqmay, waxaa ku filan in aad marka aad oggolaashada codsanaysid wareysi ku sheegto wixii kugu dhacay. Waxaa muhiim ah in aad sheegto wixii kugu dhacay oo idil, iyo saamayntii ay waxaasi kugu yeesheen. Shardi ma aha in aad sidaas xun ee laguula dhaqmay booliska u sheegtay oo aad dacwo xaraysay.

Waxaa sidoo kale jira noocyoo kale oo oggolaasho joogitaan ah

- Haddii ay Norway joogaan ilmo aad dhashay oo aad la nooshahay ama aad wakhiyo is aragtaan (samvær), waxaad codsan kartaa in lagu siiyo oggolaasho qoys isu keenid ilmaha dartood.
- Haddii guurkaaga la baabbi'iyo iyada oo ay sababtu tahay in guurka lagugu cadaadiyay ama lagugu khasbay (guurka khasabka ah), waxay taasi xaq kuu siin kartaa oggolaasho joogitaan oo madaxbannaan.
- Haddii qofka qoys ahaanta laguugu keenay magangelyo laga siiyay Norway, waxaaba laga yaabaa in aad haddaba haysato oggolaasho joogitaan oo madaxbannaan.
- Haddii aad haysato kaarka joogitaanka (oppholdskort) xubnaha qoyska ee dadka haysta dhalashada Midowga Yurub (EU/EØS) islamarkaana si xun laguula dhaqmo, waxaa laga yaabaa in aad xaq u leedahay in laguu oggolaado in aad Norway sii joogto.
- Haddii ay adag tahay in lagu yiraahdo dalkaagi hooyo ku laabo, iyada oo ay sababtu tusaale ahaan tahay in ay adag tahay in uu halkaas ku noolaado qof la soo furay ama mid wax soo furay, tan ayaa laga yaabaa in ay xaq kuu siiso oggolaasho joogitaan.
- Mararka ay jiraan xaalado gaar ahna waxaa dhici karta in lagu siiyo oggolaasho joogitaan oo ku salaysan tixgelin bani'aadminimo
- Haddii aad ka baqayso in dalkaagi hooyo laguugu gacan qaado ama si xun laguula dhaqmo, magangelyo ayaad codsan kartaa.

Shuruudo kale ayaa la socda qaar oggolaashooyinkan ka mid ah.

Wax intan ka badan ka akhriso
udi.no/vold